

Qiraalka Markhaatiga

Magaca bukaanka: _____ (“Bukaanka”)

Aniga oo ah, _____ (Magaca Markhaatiga 1-aad), iyo

aniga oo ah, _____ (Magaca Markhaatiga 2-aad),

waxaan cadaynaynaa in qofka saiiyaya “Codsigaan Daawada Soo afjarista Noloshayda”:

1. aan shakhsi ahaan u aqaano ama uu keenay aqoonsi la hubiyay;
2. in uu iskiis u saxiixay “Codsiga Daawada Soo afjarista Noloshayda” aniga oo goobjoog ahaa ama ogaa markuu saxiixayaya; iyo
3. inta aan ka aqaano oo aan ka aaminsanahay, uu leeyahay awood uu go'aan ku qaadan karo uuna iskiis u samaynayo “Codsiga Daawada Soo afjarista Noloshayda”, taasoo ah awooda go'aanka qofka aanna la saarin wax cadaadis ah si uu u saxiixo “Codsiga Daawada Soo afjarista Noloshayda.”

Ma ihi dhakhtarka u adeegaya iyo dhakhtarka la talinaya qofka saxiixaya “Codsiga Daawada Soo afjarista Noloshayda” midkoodna mana ihi xirfadle caafimaadka dhimirka qaabilsan kaasoo siinaya awoodda go'aan qaadashada qofka saxiixaya “Codsiga Daawada Soo afjarista Noloshayda” xilig “Codsiga Daawada Soo afjarista Noloshayda” la saxiixayay.

Waxaan sidoo kale qirayaa marka la eego sharciga in warbixinada aan halkaan ku bixiyay ay yihiin kuwo dhab ah oo run ah iyo wixii warbixin been abuur ah oo halkaan lagu bixiyana ay ciqaab ka dhalanayso.

Waxaan kale oo qirayaa in aanan:

1. Bukaanka la lahayn xiriir wada-dhalasho, guur ama korsasho ah;
2. xaq u lahayn qayb kamid ah dhaxalka Bukaanka marka uu dhinto ayadoo la raacayo dardaaran ama sharci dowladeed midkoodna, sidoo kalena aan sinnaba wax faa'iido ah iga soo galayn dhaqaale ahaan geerida Bukaanka;
3. ahayn mulkiile, ku shaqeeye, shaqaale ama qandaraasle madaxbanaan oo ku lug leh goobta daryeelka ee Bukaanku ka qaato daawada ama qof degaan ah;
4. ahayn lamaanaha Bukaanka, sida uu dhigayo Xeerka Go'aamada Daryeelka Qoyska (Family Health Care Decisions Act), Qaybta Sharciga Caafimaadka Bulshada (Public Health Law) ee New York 2994-a(7);
5. ahayn wakiilka daryeelka caafimaadka sida ku cad xogta daryeelka caafimaadka Bukaanka, Sharciga Caafimaadka Bulshada Farqada 2980(5); ama
6. ahayn wakiil sida ku cad wakiilashada Bukaanka, Sharciga Waajibaadka Guud (General Obligations Law) Farqada 5-1501(2).

Saxiixa Markhaatiga 1-aad: _____ Taariikhda: _____

Ciwaanka: _____

Saxiixa Markhaatiga 2-aad: _____ Taariikhda: _____

Ciwaanka: _____

Codsiga Daawada Soo afjaridda Noloshayda (Request for Medication to End My Life)

Aniga oo ah, _____ (Magaca bukaanka), waxaan ahay qof weyn oo degen Gobolka New York waxaana la iga helay _____ (Magaca xaaladda ama xanuunka aan daawada lahayn), oo ah xanuun ama xaalad aan daawo lahayn. Dhakhtarkayga ila tacaalaya ayaa go'aamiyay, ayada oo dhakhtarka la talintuna cadeeyay, in xanuunkayga ama xaaladayda aan daawada lahayn uu yahay xanuun ama xaalad aan la daaweyn karin oo aan laga bogsanayn kaasoo, markii la isticmaalo fahamka caafimaadka ee macquulka ah, sababaya geeridayda oo lix billood gudahood ah haddii daawo la i siiyo iyo haddii aan la i siininba.

Dhakhtarkayga ila tacaalaya, dhakhtarka talada bixinaya, iyo xirfadalaha caafimaadka dhimirku waxay isku raaceen in aan leeyahay awood aan go'aan ku gaari karo, taasoo micnaheedu yahay in aan fahamsanahay aana ka garowsanahay qaabka iyo cawaaqibta ka dhalata Gargaarka Caafimaadka ee Qofka dhimanaya (Medical Aid in Dying), oo ay kujiraan dheefaha, khataraha, iyo waxyaabaha badalka noqon kara, waxaanna awood u leeyahay inaan go'aan ku talagal ah ka gaaro Gargaarka Caafimaadka Qofka dhimanaya iyo inaan go'aankayga u sheego dhakhtarkayga i daryeelaya.

Waxaa si buuxda la iigu sheegay baaritaankayga iyo cudurka la iga helay, nooca daawada la ii qorayo iyo khataraha la socda, natiijada laga filayo, iyo waxyaabaha badalka u noqon kara iyo kala doorashada daawooyinka, oo ay kujiraan walow aysan ku ekayn daryeelka xanuun jabinta iyo laab-qaboojinta ah.

Waxaan codsaday in dhakhtarkayga ila tacaalaya uu ii qoro daawo soo afjaraysa noloshayda haddii aan doorto in aan qaato, waxaana dhakhtarkayga i daryeelaya u fasaxay in uu la xiriiro dhakhtar kale ama farmashiile si uu ula kaashado codsigayga.

Magaca Koowaad:

(_____) Waxaan ku wargaliyay ama waxaan damacsanahay inaan go'aankayga ku wargaliyo hal xubin ama ka badan oo qoyskayga kamid ah.

(_____) Waxaan go'aansaday in aanan go'aankayga ku wargalin xubin qoyskayga kamid ah.

(_____) Ma lihi qoys aan ku wargaliyo go'aankayga.

Waxaan fahamsanahay inaan xaq u leeyahay in aan ka laabto codsigaan ama aan diido inaan daawada isticmaalo markii aan rabo.

Waxaan fahamsanahay muhiimadda codsigaanu leeyahay, waxaana rajaynayaa inaan dhimanayo haddii aan qaato daawada la ii qorayo. Waxaan kale oo fahamsanahay in inkasta oo geeridu ku dhacayso saddex saacadood gudahood ah, haddana dhimashadaydu qaadan karto wakhti intaas ka badan, dhakhtarkayga ila tacaalaya ayaana suurtagalnimada arintaan igala hadlay.

Waxaan codsigaan u gudbisnayaa si iskay ah, taasoo ah aniga go'aankayga la imana saarin wax cadaadis ah, waxaana si buuxda u aqbalsanahay mas'uuliyadda ka dhalanaysa ficiladayda.

Saxiixa: _____ Taariikhda: _____

Markhaatiga 1-aad ("Bayaanka Markhaatiga" ayaa ku lifaaqan "Codsigaan Daawada Soo afjarista Noloshayda")

Saxiixa: _____ Taariikhda: _____

Magaca (Far waawayn ku qoran): _____

Ciwaanka: _____

Markhaatiga 2-aad ("Bayaanka Markhaatiga" ayaa ku lifaaqan "Codsigaan Daawada Soo afjarista Noloshayda")

Saxiixa: _____ Taariikhda: _____

Magaca (Far waawayn ku qoran): _____

Ciwaanka: _____

Bayaanka Tarjumaanka (Haddii uu jiro)

Magaca bukaanka: _____ (“Bukaanka”)

Magaca, _____ (Magaca Tarjumaanka):

(Calaamadee mid kamid ah xulshooyinka hoose)

- ☐ bukaanada wadahalalkooda ama la talintooda ama wadahalalkooda ama la talintooda la tarjumay lagu tarjumay luuqad aan ahayn Ingiriisi “Codsiga Daawada Soo afjarista Noloshaydu” wuxuu ahaanayaa Ingiriisi: Waxaan cadaynayaa in aan si fiican u aqaano Ingiriisiga iyo _____ (“Luuqadda Hooyo”). Waxaan leeyahay aqoon luuqadeed iyo xirfado tarjumaanimo oo awood ii siinaysa in aan si sax ah, wax ku ool ah wax u tarjumo iyo inaan si sax ah ula wadaago macluumaadka iyo wadahalalka dhex maray dhakhtarka la tacaalaya ama dhakhtarka la talinaya iyo Bukaanka.

Waxaan cadaynayaa in taariikhdu markay ahayd _____ (Taariikhda/Wakhtiga), aan tarjumay wadahalaladii iyo macluumaadkii u dhexeeyay dhakhtarka iyo Bukaanka si sax ah oo waadax aj sidoo kalena dhamaystiran ilaa iyo inta aqoontayda iyo awoodaydu gaarsiisantahay iyo in aan Bukaanka Luuqadiisa Hooyo ugu akhriyay “Codsiga Daawada Soo afjarista Noloshayda”.

Bukaanku wuxuu ii xaqiijiyay inuu doonayo inuu saxiixo “Codsiga Daawada Soo afjarista Noloshayda” si iskiis ah, taasoo ah go'aanka Bukaanka ayada oo aan wax cadaadis ah la saarin.

- ☐ bukaanka qaba naafanimada dhanka hadalka, maqalka ama aragga ah: Waxaan cadaynayaa in aan leeyahay aqoon luuqadeed, xirfado tarjumaanimo iyo/ama akhris oo awood ii siinaysa in aan si sax ah, wax ku ool ah wax u akhriyo oo/aan u tarjumo iyo inaan si sax oo waadax ah ula wadaagay macluumaadka iyo wadahalalka dhex maray dhakhtarka la tacaalaya ama dhakhtarka la talinaya iyo Bukaanka.

Waxaan cadaynayaa in taariikhdu markay ahayd _____ (Taariikhda/Wakhtiga), aan tarjumay wadahalaladii iyo macluumaadkii u dhexeeyay dhakhtarka iyo Bukaanka si sax ah oo waadax ah sidoo kalena dhamaystiran ilaa iyo inta aqoontayda iyo awoodaydu gaarsiisantahay iyo, markii loo baahday wadahalal waxtar leh, in aan Bukaanka Luuqadiisa Hooyo ugu akhriyay ama ugu tarjumay “Codsiga Daawada Soo afjarista Noloshayda”.

Bukaanku wuxuu ii xaqiijiyay inuu doonayo inuu saxiixo “Codsiga Daawada Soo afjarista Noloshayda” si iskiis ah, taasoo ah go'aanka Bukaanka ayada oo aan wax cadaadis ah la saarin.

Waxaan qirayaa in aanan:

1. Bukaanka la lahayn xiriir wada-dhalasho, guur ama korsasho ah;
2. xaq u lahayn qayb kamid ah dhaxalka Bukaanka marka Bukaanku uu dhinto ayadoo la raacayo dardaaran ama sharci dowladeed midkoodna, sidoo kalena aanan sinnaba wax faa'iido ah iga soo galayn dhaqaale ahaan geerida Bukaanka;
3. ahayn mulkiile, ku shaqeeye, shaqaale ama qandaraasle madaxbanaan oo ku lug leh goobta daryeelka Bukaanku ka qaato daawada ama degaan; ama aanan adeegyada tarjumaada u bixinayn inay qayb ka yihiin mas'uuliyadahayga shawada ee goobtaas daryeelka caafimaadka; ama in la ii tababaray inaan adeegyada tarjumaadda ah u bixinayo ujeedooyinka ku cad Bayaankaan;
4. ahayn lamaanaha Bukaanka, sida uu dhigayo Xeerka Go'aamada Daryeelka Qoyska (Family Health Care Decisions Act), Qaybta Sharciga Caafimaadka Bulshada (Public Health Law) ee New York 2994-a(7);
5. ahayn wakiilka daryeelka caafimaadka sida ku cad xogta daryeelka caafimaadka Bukaanka, Sharciga Caafimaadka Bulshada Farqada 2980(5); ama
6. ahayn wakiil sida ku cad wakiilashada Bukaanka, Sharciga Waajibaadka Guud (General Obligations Law) Farqada 5-1501(2).

Waxaan sidoo kale qirayaa in Bayaankaanu dhab ah oo run ah, iyo wixii warbixin been abuur ah oo Bayaankaan lagu bixiyo ay ciqaab ka dhalanayso marka la eego sharciga ciqaabka been-abuurka.

Waxaa laga fuliyay: _____
(Magaalada, Ismaamulka iyo Gobolka)

Saxiixa: _____ Taariikhda: _____

Magaca (Far waawayn ku qoran): _____

Xarunta Tarjumaanka lagu tababaray: _____

Ciwaanka xarunta Tarjumaanka lagu tababaray: _____

Luuqadda Hooyo ee Tarjumaanku Ku hadlayo: _____